

## Fahamka natiijadaada taban ee COVID-19

*Timaamaha dugsiga: Macluumaadka soo socda waa in la daabaco lana siiyaa waalidka ama wakiilka ardayga la baadhay ama xubinta shaqaalaha ah ee la baadhay.*

**Magaca  
ardayga:** \_\_\_\_\_

**Taariikhda  
baaritaanka:** \_\_\_\_\_

Maanta, adiga / ardaygaaga baaritaanka **la idinkama helin** COVID-19. Tani waxay ka dhigan tahay inay ay yartahay in adiga / ardaygaaga aad qabtaan COVID-19. Hasayeshee, natiijooyin baaritaan oo taban oo been ah ayaa dhici kara. Weli waa suurtagal inaad qabto COVID-19.

Haddii adiga / ardaygaagu aad leedihiin astaamo u dhigma COVID-19, fadlan wac bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wixii macluumaad dheeri ah. Raacidda baaritaan ee baaritaan COVID 19 oo aad sax u ah ayaa lagu talin karaa. Adiga/ardaygaaguba kuma laaban kartaa dugsiga ilaa dhammaan astaamuhu fiicnaadaan oo adiga/ardaygaaguba aad xumad la'aan tihiin 24 saacdo idinkoon isticmaalin dawooyinka xumada yareeya.

Haddii adiga/ilmahaagu aad xidhiidh dhow la yeelateen qof qaba COVID-19 14 maalmood ee ugu dambeeyay, waxaad dabooli kartaa shuruudda “kiis aan la dhammaystirin” oo ah COVID-19, xataa haddii manta natiijada baaritaanku noqotay lama helin. Qof kasta oo leh astaamo u dhigma COVID-19 kaas oo xidhiidh dhaw la yeeshay kiis COVID-19 ah 14 maalmood ee ugu dambeeyay ha la xidhiidho waaxda caafimaadka dadweynaha deegaanka wixii tilmaamo dheeraad ah.

Natiijadaada taban waxaa lagu soo wargelin doonaa maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga, laakiin natiijada baaritaankaaga haddii kale sir ayaa laga dhigi doonaa.

Waxaad ku heli kartaa dhokumentigan luqaddo kale, far waaweyn, qoraalka indhoolaha, ama qaabka qoraal ee aad doorbidayso. Kala xiriir Qaybta Jawaab-celinta iyo Ka soo Kabashada ee Koronafayras (CRRU) halkan 503-979-3377 ama iimayl [CRRU@dhs.oh.state.or.us](mailto:CRRU@dhs.oh.state.or.us). Waanu aqbalnaa dhammaan wicitaannada gudbinta ama waad garaaci kartaa 711.